DOWLAD GOBOLEEDKA
JUBBALAND EE SOOMAALIYA.

Golaha wakiiladda
Xafiiska Guddoomiyaha.

JUBBALAND STATE OF SOMALIA

House of Representative
Office of the speaker.

دولة إقليم جوبالاند
الصومالية

Ref:XG/BDGJS/1317/2022

08/07/2022

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Dowlad

**Ujeedo**: Ansixinta Xeerka Miisaaniyad kucelis ah Lr2, 2022.

**..arkuu arkay**: Codsiga wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dowlad-Goboleedka JL oo ku suntanaa XW/WM/DGJD/203/2022

**Markuu arkay**: Joongeynta Dakhliga Dowlad-Goboleedka Jubbaland.

**Markuu Ogaaday** : Baahidda loo qabo Ansixinta Xeerka Miisaaniyad kucelis ah

**MarkuuArkay**: Qodobka 31aad ee dastuurka dowlad-goboleedka Jubbaland

**Wuxuu**

Golaha wakiiladda Jubbaland Cod aqlabiyad ah oo gacan taag ah ku ansixiyay Xeerka Miisaaniyad kucelis ah ee 2022.

Mudanayaalka soo xaadiray (54)
Mudanayaalka ogol ku codeeyey (54)
Mudanayaalka Diidma ku codeeyey (0)
Mudanayaalka ka aamusay(0)

ALLAHA MAHAD LEH.

Mudane: Cabdi Baley Xuseen
Guddomiye kuxigeenks 2aad ee golaha Waliiladda
Dowlad Goboleedka Jubbaland. Ahna kusimaha Guddoomiyaha.

Email hon.sh.abdi@hotmail.com Tel: +252615910265,

DOWLAD GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

# XEERKA QOONDADA MIISAANIYADDA 2022

**Xeerka Qoondeynta Lr 2, 2022**
**1-da Janaayo ilaa 31-da Diseembar 2022**

**Hal ku dhag : Adeeg Bixin iyo hufnaan "**

## Ciwaanada(contents)

QEYBTA 1AAD GUUD AHAAN .......... 3

Ciwaan Gaaban .......... 3

1.1 Qeexid .......... 3

1.2 Wadarta Miisaaniyadda guud ee La Qoondeeyey .......... 4

1. **QEYBTA 2AAD** .......... 5

2.1 Awoodaha Xafiisyada Dowladda ee Maamulka Jubbaland .......... 5

2.2 Kharashaadka Waxaa Xaddidaya Dakhliga .......... 5

2.3 Wax Ka badelka Miisaaniyad la ansixiyay .......... 5

2.5 Kharashka Keydka- lama filaanka ah .......... 6

2.6 Miisaaniyadda Kabista ..........

2.7 Gashibaxa/Qaan Bax/ Deyn bax ..........

3. **QAYBTA 3AAD** ..........

3.0 KHARASH BIXIN ..........

3.1 Mudnaanta Kharash Bixinta ..........

3.2 Xareynta Dakhliga ..........

3.3 Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka ..........

3.4 Xaddiga kharash Bixinta ..........

3.5 Gedab/waajibaad ..........

3.6 Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga ..........

3.7 Dib-ubixinta Deymaha dowlada .......... 1

3.8 Lacagta aan la istic-maalin .......... 1

3.9 Warbixin Xisaabeedka/xisaab celin .......... 1

**4. QEYBTA 4AAD** .......... 1

4.1 MUDDADA DHAQAN-GALKA/XILIGA LA FULIYAY .......... 1

5. **QEYBTA 5aad**

Shaxda LIFAAQA 1AAD: MIISAANIYADA SANNADLAHA AH IYO WARBIXINTA DIB U NOQOSHADA DHABTA AH EE LA XISAABIYEY BISHII JANAAYO ILAA JUUN 2022 ..........

SHAXDA LIFAAQA 2AAD : Xeerka Qoondeynmaha Lr 2, 2022

**Xeerka Dhaqangelinta Miisaaniyadda Sanadka 2022 Ee Dowlad Goboleedka Jubbaland**

Maadaama, uu qeexayo Dastuurka Dowlad goboleedka Jubbaland ee Soomaliya in uu Golaha sharci dajintu ansixiyo, isla markaana dhaqan galiyo miisaaniyadda Sanadlaha ah. Maadaama, ay tahay lagama maarmaan in la ansixiyo, lana qaybiyo Miisaaniyadda Dowladda goboleedka Jubbaland si ay ugu fuliso hawlaheeda sanad xisaabeedka 2022. Haddaba, iyadoo laga duulayo qodobka 31aad, faqradiisa (2aad) ee Dastuurka Dowlad goboleedka Jubbaland ayaa Golaha shacabka waxa ay ansixinayaan Miisaaniyadda sanadka 2022 taas oo faahfaahinteedu ku lifaaqan tahay halkan sidoo kale xeerka dhaqangelinta Miisaaniyadda ee qodobadiisu hoos ku xusan yihiin: -

## QAYBTA 1AAD GUUD MAR

### Ciwaan Gaaban

Xeerkani waxaa uu magaciisu yahay "**Xeerka Qoondeynta Lr 2, 2022**" waxaana uu dhaqangelayaa marka la saxiixo.

**1.1 Qeexiid**

Haddii aan si kale loogu qeexin xeerkan dhexdiisa, ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha mid walba ku hor qeexan.

1. "**Sanduuqa Maaliyadda Mideysan**" waxaa loola jeedaa sanduuqa ay ku mideysanyihiin dhammaan dakhliyada Dowlad Goboleedka Jubbaland, waxaana loo adeegsadaa in lagabixiyo lacagaha, sida ku qeexan.
2. "**Ansixin**" waxaa loo la jeedaa ayidaadda/xoojinta uu wasiirku, xoojiyo /ayido Miisaaniyadda ku diyaarsan walax kharasheedka qaab wafaqsan qoondo Miisaaniyadeedka uu Golaha sharci dajintu meel mariyay/ansixiyay.

3. **"Gedab/Qaan** "waxaa loo la jeedaa waajibaadka noqonaya qaan marka shuruudaha heshiis jiray ama sharci la fuliyo.

4. **Golaha Shacabka Jubbaland**" waxaa loola jeedaa aqalka keliya ee sharci-dejinta dolwad-goboleedka Jubbaland waxuuna ka kooban yahay xubnaha baarlamaanka iyo saraakiisha kale ee Ka howl gala aqalka golaha shacabka .

5. **"Wasiir ama Wasaarad**" waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda Dowlad -goboleedka Jubbaland ama Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad -goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya siday u kala horreeyaan;

6. **"Miisaaniyadda Kabka"** waxaa loola jeedaa Xeer kasta, oo ujeeddadiisu tahay in lagu kabo qoondaynta uu hore u siiyay Xeerka Qoondaynta Miisaaniyadda;

7. **Xisaabta Mideysan Ee Dowlada "Treasury Single Account (TSA)"** waxaa loola jeedaa qaab dhismeed mideysan oo ka mid ah xisaabaadka bangiyada dowladda kaas oo siinaya aragti isku dhafan ilaha lacagta caddaanka ah ee dowladda. Iyada oo ku saleysan mabda'a midnimada lacagta caddaanka ah iyo midnimada khasnadda, TSA waa koonto bangi ama akoonno isku xiran oo ay dowladdu ku wareejiso dhammaan rasiidhada iyo lacag -bixinta.

**1.2 Wadarta Miisaaniyadda La Qoondeeyey**

Miisaaniyadda Dowlad Goboleedka Jubbaland ee somaliya ayaa si ay u meel-mariso hawlaha u qorshaysan Sanad misaaniyadeedka 2022, oo ah sida hoos ku xusan looga qoondeeyay dakhliga khasnadda iyo lacagaha kale ee Dowladda, sida lagu qeexay jadwalkan.

## 2. QAYBTA 2AAD

### MAAMULKA MIISAANIYADDA

### 2.1 Awoodaha Xafiisyada Dowladda ee Maamulka Jubbaland

1. Wasiirka maaliyadda waxaa loo Awood siiyay in uu fasaxo una qaybiyo dakhliga Dowladda Jubbaland iyo lacagaha kale.
   Cadadka halkan loogu qoondeeyay xafiisyadooda marka ay soo codsadaan mas'uuliyiinta xafiisyada Dowladda maamulka Jubbaland ee ay khusayso, si ay hawlahooda ugu fushadaan.
2. Xafiisyada Dowladda ee kharash bixinta waxaa loo awood siiyay in ay diwaan-galiyaan ciwaanka Miisaaniyadda la qoondeeyey, farac ciwaanka, mashruuca ama barnaamijyada xafiisyada, kolba kuu yahay. Waana inuu talaabada lagama-maarmaanka ah ka qaataa adeegsiga kharashaadka dowlada si wanagsan miisaaniyadda la ansixiyay ayadoo ay u adeegsanayaan si wax ku ool ah oo sharciga waa faqsan.

### 2.2 Kharashaadka Waxaa Xaddidaya Dakhliga

Waaxda Khasnaddu waa in ay bixisaa maaliyado ama lacago la kharash-gareeyo oo ku Jaan go'an dakhliga ama ilaha kale ee maaliyadeed ee Xisaabaadka Khasnadda Dowlad Goboleedka Jubbaland – ee Miisaaniyadda Caadiga ah.

### 2.3 Wax Ka badelka Miisaaniyadda la ansixiyay .

1. Miisaaniyadda Joogtada ah ee la ansaxiyey Khasnajigu waxaa uu qadarada/tirooyinka lacagaha la ansaxiyey u kala wareejin karaa qaybaha miisaaniyadda ee Wasaarad, Wakaalad ama Hay'ad Leedahay ee kujirta Jadwalka

2aad ee Xeerkan, waa marka dib-u-qoondeyntu aaney kabadneyn, wadar ahaan, 10% qaybta wax laga qaadayo. Lacagaha loo kala wareejinayo Wasaaradaha lama oggolaanayo iyada oo aanan wax ka beddel lagu sameynin Jadwalka taas oo loo marayo talaabooyin Qoondeymo Dheeri ah.

2. Sharciyada sare waxaa laga soo reebay mashaariicda ay deeq bixiyaashu maalgaliyaan.. isla marrkaasna oggolaansho ay horey u wada gaareen deeq bixiyaha iyo Khasnajiga ee ukala wareejinta madaxyada iyo Wasaaradaha dhaxdooda ah ee tirada/boqolayda(10%) loo cayimay, taas oo aan lagu jaangoynaynin jaantuska kor lagu xadiday.

### 2.3 Xadidadaha/jaangoynta Kharashaadka

1. Marka la raacayo Qeybta 22aad ee Wareegtada Maareynta Maamulka Maaliyadda ee 2021, oo laga reebo hawlgalada ku-meelgaarka ah ee maareynta lacagaha khasnadda, iyo kuwa waafaqsan xeerarka guud, waa in aan lacag laga bixin Sanduuqa Maaliyadda Mideysan marka laga reebo shey lagu aqoonsadey qiyaasaha miisaaniyad-sanadeedka ee ku yaalla Jadwalka 2aad, oo hadba wax loogaga beddelayo u kala-wareejinta lacagaha miisaaniyadda dhexdeeda oo lagu soo saaro Wareegto Qoondeymo Dheeri ah.

2. Xakameyntan ma qabanayso deeqaha aan la sii saadaalin ama laga helo Dowlada federalka ee lagu soo shubo qasnada midaysan, ujeedo gaar ahna loogu tala galay. Hadii ujeedadaas aan horay loogu darin shaxda golaha Baarlamaanka ansixiyey lacag udhiganta inta deeqbixiyahu soo shubay ayaa qoondo loo samayn madaxyo cusubna loo abuuri si kharashkaas loo bixiyo.

### 2.5 Kharashka Keydka- lama filaanka ah

Kharashka kaydka lama filaanka ah waxaa keliya ee loo isticmaali karaa xaalad degdeg ah sida fatahaado, abaaro, cuduro dilaacay ama kharashaad kale aan muuqan kolkii

miisaaniyadda la diyaarinayey IWM, looma isticmaali karo baahida kharashka caadiga ah ee xafiisyada Dowladda Iyadoo la tixraacayo Qaybta 14 ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha ee 2017 ee qoondaynta ku -meel -gaadhka ah waxay dabooli kartaa kharashyada degdegga ah iyo kuwa lama -filaanka ah ee ka yimaadda xaaladaha degdegga ah ee lacag -bixinta aan dib loo dhigi karin illaa laga meel -mariyo miisaaniyad dhammaystiran ama Miisaaniyadda Sannadka soo socoda oo isku -dhafan iyada oo aan si dhab ah loo saamayn danta guud.

**2.6 Miisaaniyadda Kabista**

Golaha sharci dajinta oo ka duulaya tala bixinta golaha fulinta ayaa meel marinaya Miisaaniyadda kabista ah.

**27. Gashibaxa/Qaan Bax**

Dib u bixinta deymaha dib -u -dhaca ku yimid bixintooda iyo dib u bixinta qarashaadka la galay muddada sannad -maaliyadeedka kahor dhammaadka sannad maaliyadeedkaas waa in lagu daraa kaydka deymaha baaqday oo loo qorsheeyay dib u bixintooda sannad maaliyadeedka xiga. Wasiirka waxaa loo oggol yahay inuu baaro dhammaan sheegashooyinka dib u dhaca ku yimid sidoo kale waa in uu go'aamiyo sharci ahaanshahooda ka hor bixintooda.

**3. QEYBTA 3AAD:- KHARASH BIXIN**

3.1 Mudnaanta Kharash Bixinta

1. Haddii ay timaado hoos u dhac dhanka dakhliga ama deeqaha wasaaraduna fulin weyso dhamaan kharashaadkii loogu talagalay Miisaaniyadda sanadka 2022, waxaa mudnaanta bixinta kharashka loo raacayaa sida ay u kala horreyaan ee hoos taxan.
   a) Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida
   b) Khidmadaha Maaliyaddu ku shaqeyso (sida Khidmadda Banka)
   c) Mushaarooyinka/gunnooyinka Shaqaalaha Rayidka ah
   d) Gunnada Xildhibaanada iyo G/Wasiirada
   e) Adeegga iyo Agabka Xafiisyada Dowladda iyo gobolada

f) Gashibaxa Alaabta iyo Qaamaha la hormarsaday

2. Haddii hoos u dhac ku yimaado miisaaniyada lagu soo bandhigo Hindise Sharciyeedkan, qaddarrada kharashyada hoos u dhigma oo dheeri ah ayaa la ansixinayaa iyada oo la filaayo in ilo dakhli oo dheeraad ah la aqoonsado isla sannad maaliyadeedkaas. Kharashaadka waxaa loo qoondeeyey shuruud ku xiran gaabinta (deficit) la aqoonsaday. Haddii ay dhacdo wax ka dhimis (hoos u dhac) shuruudaha Qodabka 3.1.1 ayaa lagu dabaqi doonaa si loo hubiyo miisaaniyad dheelitiran.

### 3.2 Xareynta Dakhliga

Dhakhliga iyo Deeqaha Dowladda Goboleedka Jubbaland hesho waa in la dhigaa Khasnadda Mideysan ee bangiyadda gaarka ah ee Dowladda 24 saacadood gudahooda oo ka bilaabanaysa marka la qabtay, haddii aysan ku soo aadin maalin aan la shaqaynaynin oo leh tixgelinteeda waqti.

### 3.3 Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka

1. Iyada oo aanu golaha sharci dajintu ogolaan, wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda duuduubka ah.
2. Lama gali karo kharash ama gedab Miisaaniyadda la ansixiyey, ka hor inta aanu ansixin ama qoondayn wasiirku.
3. Dhamaan bixinta qorsheysan waa in ay si toos ah oga baxdaa khasnadda dhexe una aadaa qaansheegatada ayadoo maareyn hay'adaha adeegga ama agabka la siiyey.
4. Dhamaan qabashada iyo bixinta lacageed ee miisaaniyadda waa in ay martaa hab- xisaabeedka dowladda (FMIS) si elektroonik ah, ka dibna la waafajiyaa warbixin xisaabeedka xisaabta dowlada ee Bangiga gaarka loo leeyahay.
5. Dhamaan bixinta qaansheegatada iyo qandarasleyaasha waa in ay martaa barnaamij xisaabeedka dowladda (FMIS), lagana bixiyaa madax iyo madax-xigeenada ku haboon ee khasnadda dhexe ee dawladda si toos ah uu u qaato qofka iyo shirkadda qaansheegtada ah.

### 3.4 Xaddiga kharash Bixinta

Ma jirto hay'ad kharash gareyn karta sanadka gudihiisa, wax ka badan qoondada loogu qoondeeyey xeerkan ee sanadka guduhiis.

### 3.5 Gedab/ Qaan

1. Wax gedab ah lagama gali karo qoondaa, kaliya inuu soo codsado Mas'uulka xafiiska Dowladda ama cid uu qoraal ku wakiishay mooyee.
2. Madax kasta oo xafiis dawladeed magali karo heeshiis ama nidaam kale oo uu baahan kharash, kaliya marka ay jirto hadhaa aan qaan ahayn oo ku filan in ay daboosho deynta lagali doono sanad miisaaniyadeedka 2022.
3. Wasaaraddu waxay aasaasi doontaa habraaca iyo diwaanka qoraya dabagalka gedebka maaliyadeed ee walax/shay miisaaniyadeed kasta.
4. Madaxa xafiiska dawladdu wuxuu yeellan doonaa diiwaanno lagu hubiyo gedabyada maaliyadeed ee walax/shay kharasheed kasta habka uu u dajiyo wasiirku.

### 3.6 Lacag Bixinta Agabka Iyo Adeegga

1. Marka laga soo tago foojarada/cadaymaha loo bahan yahay, Xafiis kasta oo dawladeed ma bixin karo lacag illaa uu xaqijiyo ama hubiyo madaxa xafiisku ama cidda kale ee uu madaxa xafiisku u xil saaray.

   **A.** Marka lacag bixintu tahay mid la xidhiidha hawl u baahan in la qabto, Allaab keenid ama addeeg.

   a. Waa in ay tahay shaqada laqabtay, allaabta la keenay ama adeegga la bixiyay & qiimaha la saaray mid waafaqsan heeshiiska ama haddii ayna heshiiska ku caddayn noqdaa mid macquul ah.

   b. Waa in ay noqoto mid-waafaqsan shuruudaha heeshiiska kharash bixintu, ka hor inta aan la dhammaystirin shaqada, aan la soo xarayn allaabta ama la helin adeegga

   c. Waa in ay ahaato kharash bixinta mashaariicdu mid waafaqsan nidaamka

iyo awaamiirta u deggan Wasaaradda, islamarkaana macquul ah oo sugan.

B. Lacagta kharash kasta oo kale waa in ay ahaato mid uu lacag-qaatuhu xaq u- leeyahay, qaadashada lacagta uu qaatay.

2. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa nidaam lagu xaqiijinayo/ hubbinayo cadaymaha uu u baahan yahay qodobkani.

**3.7 Dib-ubixinta Deymaha dowlada**

1. Wasiirka Waxaa Loo Oggol Yahay Inuu Dib U Bixiyo Deymaha Dowlada Si Waafaqsan Heshiisyada Amaahda.

**3.8 Lacagta aan la Istic-maalin**

2. Iyadoo Lagu Xeerin Doono Wareegtooyin Ay Wasaaraddu Soo Saarto Ayaa Waxaa Lagu Celin Khasnada Dhexe Hadhaaga Miisaaniyadda La Qoondeeyey Ee Sanad Miisaaniyadeedku Ka Dhacay, Oo Aan La Istic-Maalin.

**3.9 Warbixin Xisaabeedka/Xisaab Celin**

Warbixinta Miisaaniyadda Ayaa Si Bille Iyo Rubac Sanadle Ah Lagu Daabici Doonaa Website-Ka Wasaaradda, Xilliga Kama Danbeysta Ah Ee Bilkasta Loo Baahan Yahay Ee Sida Ku Xusan Sharciga Maamulka Iyo Maaliyadda Ee Dowlada Jubbaland Iyo Xeer Hoosaadyada La Xiriira.

# 4. QEYBTA 4AAD:- QOONDADA MIISAANIYADDA

## 4.1 MUDDADA DHAQAN-GALKA

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa Marka Golaha Sharci dajinta Jubbaland ansixiyo, uuna saxiixo Gudoomiyaha Barlamaanka Dowlad Goboleedka Jubbaland ee Somaliya

Waxaan saxiixay oo aan shaanbadeeyey Maanta oo aay taarikhdu tahay ----------------------------------

Taariikh/...08......./...07......../2022